# Ka Joojinta Ardayga Dugsiga

Student Suspensions

## Waa maxay iskuul ka fariisintu?

Kolka arday uu dhib gaysto inta uu iskuulka joogo, iskuulku waa khasab inuu u hogaansamo sharciga. Dhamaan gudoomada waxbarashada oo dhami waa inay lahaadeen habraac degsan oo ebdinta ku saabsan. Ardayga waa loo diidi karaa fasalka, xiisad fasal, maalin ama maalmo badan. Hadii akhlaaq xummadu sii socoto ardayda waa la eryi karaa. Waydiiso ilmahaaga iskuulkiisa nuqulka nidaamka edbinta ee iskuulka. Ogow xaquuqda uu leeyahay ilmahaagu.

**Hadii ilmahagau uu naafo yahay ama uu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah waxaa jira xeerar kale oo dheeraad ah oo ay tahay in iskuulku uu u hogaansamo. Si aad u hesho akhbaar kale wac Rugta Sharciyada Naafada ee Minnesota wac (Disability Law Center) ee khadkeedu yahay (612) 332-1441 ama 1(800) 292-4150.**



Ka wac xafiiska gargaarka dhanka sharciga (legal aid) ee deegaankaaga si aad caawimaad ama gudbin aad uga hesho khadka ah 1-(877) 696-6529.

## Ciqaabid caynkee ah ayuu iskuulku isticmaali karaa?

**Saarid:** Ardayga waxaa laga saari qaar ka mid ah fasalada ama hawlaha qaarkood. Tani kama badnaan karo 5 cisho.

**Joojin:** Ardayga looma ogolaan doono inuu iskuulka dhigto 1-10 cisho.

**Eryid:** Ardayga looma ogolaan doono inuu iskuulkiisa ama iskuul kale oo gudoonku leeyahay uu dhigto, muddo gaari karta ilaa iyo 12 bilood.

**Reebid:** Ardayga looma ogolaan doono inuu is qoro ama dib-isu qoro iskuul inta ka dhiman sannad-dugsiyeedka.

Runtii waa ay adag tahay in laga mudaco iskuulka ka joojinta ardayda ama in laga saaro. Sidaa awgeed, waa fikrad fiican inaad la hadasho iskuulka si aad u raadisaan qaabab iskuulka ka joojinta ama edbinaha la isaga dhowri karo mustaqbalka. Kuwaasi waxa ay noqon karaan ardayga oo caawimaad badan hela, si fiican isaga warqabka waalidka iyo iskuulka ama qaabab kale oo wax looga qabanayo habdhaqanka aan fiicnayn. Haddii aad aaminsan tahay in edbintu aysan waafaqsanayn xeerka Iskuulka, waxa aad ka ashtakoon kartaa.

**Habdhaqan caynkee ah ayuu ardaygu ku mutaysan karaan ciqaab?**
Waxaa jira noocyo badan oo dhaqan-xummo ah oo keeni kara ciqaab. Labada ugu badani waa:

- **Dagaal – Ardayda waa lagu ciqaabaa dagaalka, riixida ama tuurida. Labadii arday ee** feertanta waa laga joojin karaa iskuulka. Waxaa dhici karta inaan gaar loo eegin cidii dagaalka bilowday. Iskuulku waa uu soo eryi karaa ilmahii dhaawac u geysta ilmo kale.
- **Xurmo-darrada** – Ardayda iskuulka waa laga soo eryi karaa hadii ay xurmo darro ku sameeyaan macalimiintooda. Ardaygii aan sameyn waxa macallinku yiraa samee ama hadal ku cesha macallinka isagoo af xun isticmaalaya waa laga saari karaa ama laga fariisan karaa iskuulka.

## Waa maxay waxa inuu iskuulku sameeyo ay tahay kolka ay ilmaha iskuulka ka joojiyanaan?

1. **Inay qabtaan shir maamul oo yar ka hor inta aysan iskuulka ka joojin ilmahaaga?**
   Iskuulku waa ku khasab:
   - In ilmagaagu uu la kulmo maamulaha iskuulka,
   - Inuu sharxo wixii daliilo ah ee jira,
   - Inuu u sheego ilmahaaga sababta loo saarayo joojinta, iyo
   - Inuu u ogolaado in ilmagaagu uu sharxo dhankiisa sheekada sida wax u dhaceen ah.

**Iskuulka waxaa dhici karta inuu qabto kulanka ka dib kolka iskuul ka joojintu ay bilaabanto hadii ay jirto "khatar weyn oo markaa taagan" oo ay ku jiri karaan ardayda ama ilmahaagu.**

Waalidku xaq **uma** laha inuu ka qayb galo kulankan. Qaar ka mid ah iskuuladu waxa ay doonaan in waalidku uu shirka joogo. Ama waxa ay la yeeshaan kulan kale waalidka si ay uga wada hadlaan habdhaqanka ilmaha. Waalidku waxaa kala qaybgeli kara kulanka dad kale oo ku lug leh nolosha ilmaha hadii ay qoraal ku codsadaan taa.

**Mar labaad, hadii ilmahaagu uu naafo yahay ama uu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah, waxaa jira xeerar dheeraad ah oo ay tahay in loo hogaansamo. Si aad uga hesho akhbaar kale, wac Rugta Sharciyada Naafada ee Minnesota wac (Minnesota Disability Law Center) ee khadkeedu yahay (612) 332-1441 ama 1(800) 292-4150. Ka wac xafiiska gargaarka dhanka sharciga (legal aid) ee deegaankaaga si aad caawimaad ama gudbin aad uga hesho khadka ah 1-(877) 696-6529.**

2. **U fidinta adeegyo waxbarasho oo qaabab kale ah**
   Iskuulku waa khasab inuu siiyo adeegyo waxbarasho oo qaabab kale ah ardaygii la siiyo wax iskuulka ka joojin ah oo ka badan 5-cisho. Adeegyadda waxbarasho ee kale waxay noqon karaan waxyaabaha sidda gaar wax u barida, fasalada khadka (online), fasaladda guriga lagu qaato ama adeegyo kale. Wixii ka joojin ardayda ee dugsiga ah, iskuulku waa inuu siiyo ilmahaaga fursad uu ku sameeyo hawsha fasalka iyo shaqadda guriga ee laga rabo xilliga iskuulka laga joojiyey, si kolkaa ilmahu uusan dib uga dhacin waxbarashada fasaladda.

3. **Kugula socodsiinta adiga qoraal ahaan waxa jira**
   Iskuulku waa inuu siiyaa ilmaha ogaysiis qoran oo u sheega: Sababta looga joojinayo tacliinta
   - Waxa dhacay
   - Waxa ilmahaagu ama cid kale oo makhaari ahi ay ka tiri waxa dhacay
   - Qorshe dib ugu soo celin ilmahaaga iskuulka, iyo
   - Oraah ah xaquuqda sharciganka ah ee ilmahaaga.

   Ilmahaagu waa khasab inuu helo ogaysiiskan ka hor ama waqtiga iskuulka ka joojinta. Iskuulku waa khasab inuu nuqul boostada kuugu soo dhigo 48 saac gudahood waqtiga shirka. Waa inay sidoo kale isku dayaan inay kuu soo wacaan degdeg joojinta ka dib.

4. **Talaabooyin kale oo dheeraad ah hadii ilmahaaha marmar badan iskuulka laga joojiyo.**
   Haddii ilmahaaga laga saaro iskuulka muddo ka badan 10-cisho sannad-dugsiyeedka, isluulku waa khasab inuu ku dadaalo intii uu awoodo inuu kula kulmo adiga ka hor inta aan wax kale oo iskuul ka joojin ah aan la sameyn. Xilliga kulanka waxa aad kala hadli iskuulka in ilmahaagu uu u baahan yahay adeego dheeraad ah ama qiimeyn iyo in kale.

   Waxaad kaloo oo aad ka codsan kartaa inay kula yeeshaan xiriir fiican oo iska warqabid ah adiga, ama helaan qaabab ka duwan kuwii hore oo ay wax uga qabanayaan habdhaqanka xun ee ilmahaaga dhibka la yimid.



## Hel Caawin

Hadii ilmahaaga la ciqaabo ama laga saaro iskuulka, wac xafiiska (legal aid) ka si aad caawimaad ama meel kale u gudbin aad uga hesho ee 1(877) 696-6529. Ama la xiriir Barnaamijka Sharciyada Dhalinyarada ee Minneapolis uga hesho (Youth Law Project) ee khadkiisu yahay (612) 332-1441.

Ka eeg warqadayada xog aruurinta wixii kale, ee
*Kolka Ilmahaaga Iskuul Laga Soo Cayriyo: Iskuulka Eryida*.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**